
Talyaaniga

# WAXA AAD U BAAHAN TAHAY INAAD KA OGAATO EURODAC






SOMALI

# MAXAAN U HELAYAA BUUG-YARAHAN?

Buug yarahan waxaad u heleysaa sababtoo ah xogtaada bayometriga ah waxaa qaadi doona maamulka.



Xogta bayometriga waxay ka dhigan tahay farahaaga iyo sawirkaaga.

Xogtan, oo ay la socoto macluumaadkaaga aqoonsiga iyo macluumaad kale oo muhiim ah, waxaa loo gudbin doonaa keyd wadaagga Yurub ee loo yaqaan Eurodac.

Xuquuqdaada inta hawshan socoto iyo waxa lagaa filayo ayaa lagu sharaxay buug yarahan.

# WAA MAXAY EURODAC?

Eurodac waa kayd xogeed oo Yurub ah oo kaydiya isla markaana isbarbardhiga macluumaadka qaar ka mid ah dadka soo gala waddamada EU+. Qeybhani waxaa lagu faahfaahiyey buug-yarahan.

Keydkan waxaa isticmaala dhammaan 31 waddan oo EU+ ah kuwaas oo diyaarin kara xogtaada si ay u helaan macluumaadkaaga. Haddii aad u safarto waddan kale oo EU+ adigoon haysan ogolaansho oo farahaaga mar kale la qaado, dhammaan xogtaada ku jirta Eurodac waxaa arki doona masuuliyiinta waddankaas. Xaaladaha qaarkood, xogtaada waa la cusbooneysiin doonaa iyadoo la adeegsanayo macluumaad cusub.

# WAA KUWEE WADDAMADA EU+ KA?

**Adigu waxaad imika joogtaa Talyaaniga kaasoo ah waddan ka tirsan EU+. Waddamada EU+ waa:**

27-ka Dowladdood ee Xubnaha ka ah Midowga Yurub (EU): Awstiriya, Biljam, Bulgariya, Kroasiya, Qubrurs, Jamuriyada Cerchia, Denmark, Estoniya, Finland, Faransis, Jarmal, Giriig, Hungari, Talyaani, Latviya, Litwaniya, Luksemburg, Malta, Nederlandese Holland, Boland, Burtuqaal, Jamhuuriyada Ireland, Rumania, Slovakiya, Sloveniya, Isbania, Iswiiden iyo

4 waddan oo kale: Aysiland, Liechtenstein, Norway, Iswisarland.

## WAA MAXAY UJEEDDADA EURODAC?

Eurodac waxa ay leedahay shan ujeeddo oo waaweyn:

- in uu ka caawiyo waddamada EU+ go’aaminta waddanka mas’uulka ka ah baarista codsiga magangelyo
- in uu ka caawiyo la socodka socdaalka sharciga ah iyo kan aan sharciga ahayn ee waddamada EU+.
- in uu xog wadaag ka dhigo hay’adaha qaran iyo in laga hortago dambiyada iyo argagixisada.
- in uu hubiyo in carruurta soo gaaraysa Yurub la raadin karo lana ilaalin karo.
- in uu hubiyo in kaydadka kale ee Yurub ee xogta laga hayo, sida fiisooyinka, ay si sax ah u shaqeeyaan.



## XOGAHEE AYAA LAGU KAYDIYAA EURODAC?

Eurodac wuxuu kaydiyaa xogta dadka aan ahayn muwaadiniinta waddan EU+ ka tirsan oo:

- codsaday magangelyo.
- soo galay xuduudda waddan EU+ isagoon oggolaansho haysan.
- la dejiyay waddan EU+ ka dib markii bad lagaa soo bad baadiyey badda.
- ku sugan waddan EU+ si sharci darro ah.
- soo gaaray waddan EU+ iyada oo loo marayo barnaamij dib-u-dejin ama magangalyo bini’aadantinimo ah ama barnaamij qaran oo dib-u-dejin ah.
- helay ilaalin ku meel gaar ah.

## YAA ARKI KARA XOGTAYDA?

Hay'adaha magangelyada qaranka ee waddanka EU+ ayaa qaadi doona xogtaada bayometriga ah, waxayna u gudbin doonaan Eurodac, sidoo kalena waxay heli doonaan natiijada isbarbardhiga.

Hay'adda Iskaashiga Booliiska iyo Hay'adaha Sharci-dajinta ee EU iyo booliiska qaranka waxay codsan karaan inay galaan Eurodac si looga hortago, loo ogaado, loona baadho dambiyo culus iyo argagixiso.  Waxay ka raadin karaan xogtaada Eurodac.

**MUHIIM!** Hay'adaha waddankaaga hooyo ma awoodi doonaan inay helaan xogtan.

## MAXAA DHACA HADDII AAN DIIDO IN FARO LAIGA QAADO?



Sharcigu wuxuu kugu qasbayaa inaad bixiso xogtaada bayometriga ah.

Waxaa jira sababo muhiim ah oo loogu baahan yahay farahaga. Haddii aad codsatay magangelyo, tani waa tallaabo lagama maarmaan ah oo habraaca ah.

Xogta faraha sidoo kale waxay gacan ka geysan kartaa in la helo xubnaha qoyska ee ku sugan waddamada EU+.

Haddii farahaagu dhaawacmaan, farahagu mar kale ayaa la qaadi doonaa mustaqbalka.

Haddii aad si ula kac ah u dhaawacdo farahaga, waxaa jiri doona cawaaqib xun.

Tusaale ahaan, haddii aad codsatay magangelyo, habraaca waa la joojin karaa.

Haddii habraaca laga joojiyo kiiskaaga, tani waxay ka dhigan tahay inaan laguu aqoonsaneen codsade (magangelyo doon). Waxaad waayi doontaa dhammaan xuquuqaha la xiriira xaaladdaas, hadda iyo mustaqbalka.

Hay'adaha waddamada EU+ ayaa adeegsan kara qasabka sida talaabo ugu dambeysa si ay u helaan xogtaada bayometriga ah. Sidoo kale weey kuxiri karaan, si talaabada ugu dambeysa ah, si loo go'aamiyo ama loo xaqiijiyo aqoonsigaaga.

Hadii aad diido inaad siiso farahaga hay'adaha waddankan, waxaa jiri doona cawaaqib gaar ah.

Gaar ahaan, diidmada noocan ah waxaa loo tixgelin karaa inay tahay calaamad muujinaysa in qofku aanu la shaqaynayn hay'adaha ay khusayso, waxayna sidoo kale noqon kartaa arrin keenta in lagu dabaqo haynta maamul (xannibaad). Intaa waxaa dheer, hab-dhaqankan waxaa laga yaabaa inuu muhiim u noqdo go'aaminta in la galo qalabka elektaroonigga ah ee uu haysto qofka ay khusayso, si loo fuliyo hawlaha xaqiijinta iyo aqoonsiga.

## WAA MAXAY XUQUUQDAYDA KU SAABSAN XOGTA EURODAC?

Dalkasta oo ka tirsan EU+ wuxuu leeyahay hay'ad maamusha isticmaalka xogta. Waxaad xaq u leedahay inaad la xiriirto kantaroolaha xogta iyo sarkaalka ilaalinta xogta oo aad codsato inaad hesho xogtaada ku kaydsan Eurodac.

Waxaad codsan kartaa in macluumaadkaaga la saxo haddii aad u aragto inuu yahay mid:

- khaldan oo u baahan in la saxo
- dhammaystirnayn oo u baahan in la cusbooneysiiyo

Waxaad codsan kartaa in macluumaadkaaga la tirtiro haddii aad u aragto

- in loogu daray Eurodac si aan sharciga waafaqsanayn.

Waxaad ka heli kartaa faahfaahinta xiriirka kantaroolaha xogta iyo sarkaalka ilaalinta xogta bogga ugu dambeeya ee buug-yarahan, oo cinwaankiisu yahay **'macluumad kale oo faaido leh**'.

Haddii aad rabto inaad cabasho rasmi ah ka dhiibato sida xogtaada loo maamulay, waxaad la xiriiri kartaa hay'adda kormeerka qaranka.

Waxaad ka heli kartaa faahfaahinta xiriirka hay'adda kormeerka qaranka bogga ugu dambeeya ee buug-yarahan.

# MACLUUMAD KALE OO MUHIIM AH

## MACLUUMAAD KU SAABSAN XIRIIRKA XAFIISKA KANTAROOLAHA XOGTA

Hoos waxaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan sida loola xiriiro xafiiska kantaroolaha xogta iyo sarkaalka ilaalinta xogta ee dalkan.

Kantaroolaha xogta wuxuu ku wargelin karaa xogtaada shakhsiyeed ee ku kaydsan Eurodac. Haddii xogtaada shakhsiyeed aan si sax ah loo kaydin, waxaad codsan kartaa in xogtaas la saxo.

Haddii aad u aragto in xogtaada si aan sharci ahayn loo maamulay, waxaad codsan kartaa in xogtaas la tirtiro adigoo adeegsanaya macluumaadka xiriirka ee hoos ku qoran.

**Mas'uulka Xogta Ka Shaqaynta (Titolare del trattamento):** Wasaaradda Arrimaha Gudaha – Waaxda Amniga Dadweynaha (Dipartimento della Pubblica Sicurezza), oo xarunteedu ku taallo Piazza del Viminale 1, IT-00184, Roma.

**Mas'uulka Ilaalinta Xogta Shakhsiyeed (Responsabile della Protezione dei Dati personali):** Xafiiska Xoghaynta Waaxda – Xafiiska VI – Amniga Xogta ee Booliska Gobolka (Polizia di Stato), oo xarunteedu ku taallo Piazza del Viminale 1, IT-00184, Roma. Iimayl: rpd.dipps@pecps.interno.it

**Meesha lala xiriirayo (Punto di contatto):** Direzione Centrale per la Polizia Scientifica e Sicurezza Cibernetica – Via Tuscolana 1538 – Roma.

**Iimayl:** dipps037.0200@pecps.interno.it

## MACLUUMAAD KU SAABSAN XUQUUQDA SHAKHSIGA

Dalkan, waxaad leedahay xuquuqo gaar ah oo ku saabsan isticmaalka xogtaada shakhsiyeed.

- Xaqa aad u leedahay in laguu sheego sida xogtaada shakhsiyeed loo isticmaalo loona maareeyo;
- Xaqa aad u leedahay inaad hesho xogta shakhsiyeed ee adiga kugu saabsan;
- Xaqa aad u leedahay inaad codsato in la saxo xogta aan saxda ahayn ama aan dhammaystirnayn;
- Xaqa aad u leedahay in xogtaada la tirtiro marka ay jiraan xaaladaha uu sharcigu dhigayo;

## MACLUUMAAD KU SAABSAN XIRIIRKA HAY'ADAHA KORMEERKA QARANKA

Waxaad adeegsan kartaa macluumaadka hoose si aad ula xiriirto hay'adda kormeerka qaranka ee dalkaaga.

Waxaad samayn kartaa cabasho rasmi ah oo ku saabsan hay'adda kormeerka qaranka haddii aad u aragto in xogtaada shakhsiyeed si sharci-darro ah loo maamulay.

**Meesha lala xiriirayo:** Direzione Centrale per la Polizia Scientifica e Sicurezza Cibernetica – Via Tuscolana 1538 – Roma

**Iimayl:** dipps037.0200@pecps.interno.it

# QORAALADAYDA

Buug-yarahan waxaa loogu talagalay ujeedooyin macluumaad oo keliya. Keligii ma abuuro xuquuq ama waajibaad Hay'adda Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ayaa bixisay qaybta ugu weyn ee agabkan, waxaana EUAA kaliya oggolaatay in la nuqulo ama wax laga beddelo buug-yarahan Waddamada Xubnaha ka ah EU. EUAA ma qaado wax mas'uuliyada ama xil ku saabsan saxsanaanta, nuxurka, dhameystirnaanta, sharcinimada ama kalsoonida macluumaadka ku jira buug-yarahan ee ay bixiyeen Waddamada Xubnaha ka ah EU ama dhinac saddexaad oo mas'uul ah. EUAA iyo cid kasta oo ku shaqaysa magaca EUAA midna mas'uul kama aha isticmaalka laga yaabo in laga sameeyo macluumaadka ku jira buug-yarahan.

© Hay'adda Midowga Yurub ee Magangalyada, 2025